

# CAAFIMAADKA

Ku caawimeysa dhibbanayaasha colaada hubeysan iyo masiibooyinka iyadoo u hagaajineyo helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah.

## KU CAAWINAAYA HOYADA HAGAAJINTA NAFAQADA CANUGA, SOOMAALIYA



©Pedram Yazdi/ICRC

Waa waqtiga qadada jikada Stabilization Centre Baydhabo waxay ku mashquulsantahay cunti siinta hooyada iyo xanaano bixiyeyasha

Soomaaliya waxaa burburiyey tobanaan sano oo colaad hubeysan ayna carqaladeeyey dhismaha habnololeedka bulshada kuna riday jahawareer. Abaaraha dhacaya xilliyyada iyo fatahaadaha ayaa dhibaatada sii xoojiyey ayagoo qeyb ka mid ah waddanaka ka abuuray cunto yari ba'an. Caruurta, gaar ahaan kuwa da'dooda ka yartahay shan sano ayaa u nuqul cudurada ka dhasha cunto yarida oo aan la hubinin nafaqo darida ka dhalaneysa in ay tahay dilaa.

\*Maryan waa 23 jir waxay caungeed oo 9 bilood jirka ah keentay Isbitaal Goboleedka Baydhabo. Canugga wuxuu muuqdaa mid dacif ah oo hurdo barkeed ku haysta gacmaheeda.

"Muddo dheer ayuu xanuunsanaa. Waxaan tagey tiro xarumo caafimaad midna uma muuqan in uu shaqeynayo. Waxaa la i dhigay halkaan ee Isbitalka, waan u duceynaa in ay bogsato."

Isbitaal Goboleedka Baydhabo Xarunta Xanaanada deg degga ah ee nafaqo darida. Maryan canugeed waxaa la siin doonaa quudin dheeri ah lagana daweeeyay cuduro la xiriira nafaqo darida. Wuxuu barnaamijka quudinta ku joogi doonaa ill uu gaaro culeyska ugu fican.

Ka gadaal bixitaankii deg degga ahaa ee Medicines Sans Frontiers (MSF) kaga baxeen Soomaaliya Agoosto 2013, hawlaha caafimaadka ayaa si xun waxyeelo u gaartay. Nofembar 2013, ICRC waxay go'aansatay in ay taageerto Isbitalka Kismaayo qeybta bukaan jiifka lagu nafaqeyyo (Stabilization Centre). Waxay barnaamij kaa la mid ka bilowday Isbitaal Goboleedka Baydhabo Maay 2015.

Nafaqo darida waa dhibaato baahday oo haysata caruurga ku nool Soomaaliya. Badanaa waxaa sababa cunto la'aan iyo fikrada khaladan oo laga aaminsyahay habka quudinta.

Maryan waa ay joojisay naas nuujinta canugeed mana rabto in mar kale nuujiso. Waxaa suurtagal ah in ay uur qaado, naas nuujintana waxyeelo gaarsiiso canuga uurka ku jira.

"Waxaa jiraa aqoon la'aan dhanka baahiyaha nafaqada caruurga. Waa muhim in barnaamijka uu la shaqeeyo hooyoooyinka iyo xanaano bixiyeyasha si ay dadka ugu dhaadhiciyaan hababka quudinta habboon," waxaa sidaa yiri Kristy Manners, ergo ka tirsan ICRC u qaabilسانا barnaamijka nafaqeynta.

Xarunta, Maryan waxaa lagula taliya caadooyinka quudinta habboon iyo muhimada caafimaadka canuga u leedahay caanaha naaska. Arrinteeda wuxuu muhimad gaar ah siinaya baahida barnaamijka bukaan jiifka halkaas oo hooyada si joogto ah ula xiriireyo shaqaalaha nafaqeynta intaasna canugeeda soo kabsanaayo.

Isbitalka Baydhabo qeybta Xarunta Xanaanada deg degga ah ee nafaqo darida wuxuu hooyada siya cunto saddex jeer ah maalintii iyo xanaano bixiyeyaal ilaa iyo mudada soo kabsashada canuga.

Tirada bukaan oo soo booqanaaya xarunta waa ay saddex jibaarantay tan iyo intii si buuxda u hawl gashay. Tani waxaa sabab u ah habka guud ee barnaamijka u taageero canuga iyo hooyada ama xanaano bixiyaha.

Sida laga soo xigtay ururada caalamiga ah, ku dhowaad 200,000 caruur ku sugan Soomaaliya ayaa nafaqo xumo haysaa, ku dhowaad 38,000 kuwaas ka mid ahna ayaa si ba'an nafaqo xumi u haysaa waxayna si daran ugu baahanyihii quudin ku daweyn iyo daaweynta caafimaadka. Labada xarumood la xusay, inkastoo keligood isku filneyn waxay bixisaa meel laga helo xanaanadan muhimka ah ee koofurta iyo bartamaha Soomaaliya

\* Ma ahan magaca dhabta ah

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya booqo [www.blogs.icrc.org/somalia/so](http://www.blogs.icrc.org/somalia/so)

Email: [sok\\_somaliblog\\_services@icrc.org](mailto:sok_somaliblog_services@icrc.org)



Instagram

@icrc\_somalia